# Racfaanka Diidmada Gargaarka Farsamada Casriga Ah

Assistive Technology Appeals: Medical Assistance

## Waa maxay Gargaarka Caafimaadku (Medical Assistance -MA)?

Waaxda Adeegga Dadweynaha ee Minnesota (DHS) ayaa maamusha Barnaamijka Ceymiska Caafimaadka (MA). Waxaa jira habab kala duwan oo aad ku heli karto ceymiska caafimaadka:

- Waxa aad si toos ah MA uga heli kartaa DHS. Taas waxaa lagu magacaabaa adeegga lacagla'aanta ah ee Ceymiska Gobolka.
- Waxa kale oo suurogal ah in aad heysato ceymiska caafimaadka laakiin aad adeegga ka hesho ceymis gaar ah. Tan waxaa lagu magacaabaa maareynta caafimaadka.
- Qaar ka mid ah dadka heysta ceymiska MA ayaa loo fidiyaa adeeg dheeraad ah iyada oo loo mariyo barnaamijyada bulshada. Barnaamijyada bulshada waxaa maamula degmada.

Barnaamijyadaas oo dhan waxaa laga maalgeliyaa gargaarka farsamada casriga ah.

## Waxa aan heystaa MA waana la ii diiday gargaarka farsamada, maxaan yeeli karaa?

Haddii aad weydiisato mid ka mid ah barnaamijyada inuu bixiyo gargaarka farasamada casriga ah, waa in barnaamijku kuu soo diraa qoraal uu lagugu wargelinayo codsigaaga la la ogolaaday ama la diiday .




- Haddii aad heysato ceymiska **adeegga lacag la'aanta ah**, ogeysiiska waxaa kuu soo dira DHS.
- Haddii aad heysato **barnaamijka maareynta daryeelka**, ogeysiiska waxaa kuu diraya ceymiska .
- Haddii aad ka diiwaan gashan tahay **barnaamijyada bulshada ee laga daayey** waxaa kuu soo diraya degmada ama shaqaalaha kula shaqeeya.

Haddii uu diido codsigaaga mid ka mid barnaamijyadaas waxa aad ka qaadan kartaa racfaan. Waxa kale oo aad racfaan ka qaadan kartaa haddii uu barnaamijku ogolaado qalabka ama adeegga laakiin aanu ogolaan lacag ku filan oo lagu bixiyo.

Inta aadan racfaanka qaadan, la tasho iibiyaha qalabka. Iibiyaha waa shirkadda aad ka iibsaneyso qalabka ama adeegga. Xaalaaha qaarkood, waxaa suurogal ah in ay soo gudbin karaan macluumaad dheeraada oo adiga iyo barnaamijka isku af garataan oolaogolaado adiga oo aan racfaan qaadan.

## Sidee ayuu racfaanku u shaqeeyaa?

Racfaanku waa fursad aad ku weydiisaneyso in dib loo eego go'aanka. DHS ayaa dhagysata dhamaan racfaanka MA ee barnaamijyada adeegga guryaha iyo kuwa bulshada ee laga daayey. Waxaa dhageysi kuu qabanaya qaali ka socda adeegga dadweynaha oo u shaqeeya DHS. Waxa aad fursad u heysataa in aad qaaliga u sheegto sababta aad u dooneyso in codsigaaga la ogolaado. Qaaliga ayaa go'aan ka gaara oo talo u soo jeediya Gudoomiyaha Xafiiska Adeegga Dadweynaha.



## Goorma ayaan racfaan ka qaadan karaa go'aanka MA?

Haddii aad heysato ceymiska MA ee adeegga lacag la'aanta ah, waxa aad heysataa **30 cisho oo maalmaha shaqada** ah laga soo bilaabao taariikhda go'aanka diidmada. Waxa aad heysataa ilaa 90 maalmood in aad racfaan ku qaadato haddii ay jirto sabab wanaagsan oo aadan racfaanka ku qaadan. Sababaha wanaagsan waxaa ka mid noqon kara in isbitaal lagu dhigay ama qof ka geeriyoday qoyska. Isku day in aad cadeyn la timaado sababta aadan racfaanka u qaadan, sida warqad uu dhakhtarka kuu qoro. Codsigaaga soo raaci cadeynta ama qaali u gudbi xilliga dhageysiga.

Haddii heysato ceymiska maareynta daryeelka, waa **waajib** in aad adeegsataa nidaamka racfaan qaashada ee ceymiska ka hor inta aadan racfaan u qaadan DHS. Waxa aad heysataa 60 maalmood in aad ku qaadato racfaanka laga bilaabo taariikhda diidmada ceymiska. Ceymisku waa in ay go'aan ku gaaraan 30 maalmood gudahood iyaga oo codsan muddo kordhin ilaa 45 cisho ah. Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka qorshaha, ama haddii aadan ku helin go'aan 30 (ama 45) cisho gudahood, kolkaa waxa aad ka xareysan kartaa racfaan hay'adda DHS ka. Waa inaad ku xaraystaa racfaanka 120 cisho gudahood kolka uu soo baxo go'aanka qorshahu.

## Maxaan yeelayaa haddii aysan MA diidin ama ogolaan codsigeyga laakiin ay i weydiiyaan macluumaad dheeraad ah?

Marka DHS ku weydiistaan macluumaad dheeraad ah waxa ku qoran ogeysiiska" go'aan lagama" gaarin ama "talaabo lagama qaadin." Inta badan marka ay DHS ku weydiiyaan macluumaad dheeraad ah waxa ay doonayaan waxyaabo gaar ah. Haddii aanay DHS kuu sheegin waxyaabaha kaa dhiman, weydii nooca macluumaadka lagaa doonayo in aad soo gudbiso. haddii waxyaabaha ay doonayaan ay la xiriirto daawada, dhakhtarkaaga ama qofka ku dawynaya ayaad weydiisan kartaa inuu u diro macluumaadkaas.

Haddii aadan heli karin gargaarkaaga farsamada casriga ah oo ay ugu wacan tahay DHS oo ku weydiisanaya macluumaad dheeraad ama aad dareensan tahay inuu jiro dib u dhac aan muhim aheyn, waxa aad codsan kartaa dhageysiga racfaanka halkii aad ka soo diri laheyd xog dheeraad ah. Haddii ay taasi dhacdo waxaa laga yaabaa in ay haboon tahay in aad la xiriirto Xarunta Dadka Naafada Ah ee Minnesota (612) 334-5970 ama 1(800) 292-4150.


## Maxaan yeelayaa haddii lacagta ay ii ogolaadaan aysan ku filneyn iibka farsamada casriga ah?

Mararka qaarkood DHS ama ceymiska maareynta caafimaadka way ogolaadaan qalabka aad codsatay laakiin lacagta ay ogolaadeen way yar tahay taasoo aadan u heli karin adeegga ama qalabka aad dooneyso. "Ogolaashaha" ayaa ah dhab ahaantii diidmo ah. Waa in aad ka qaadataa racfaan. Xaaladdan oo kale, caawinaad aad ka hesho qof kuu dooda oo leh waayo aragnimo balaaran waa muhim.

## Sidee Ayaan Ku Codsan Kkaraa Racfaanka DHS?

Si aad u codsato dhageysiga racfaanka, waraaq u qor DHS. U qor waraaq fudud. Waxa kaliya oo lagaa doonayo waa in aad cadeyso in aadan ku raacsaneyn go'aanka oo aad dooneyso in aad racfaan ka qaadato. Waa wanaagsan tahay in aad soo raaciso warqadda diidmada warqadaada.

Warqadda u soo dir:




MN Department of Human Services
adeegga (Waaxda Adeegga Dadweynaha ee Minnesota)
Appeals Office (Xafiiska Racfaanka)
P.O. Box 64941
St. Paul, MN 55164-0941

Faakis: (651) 431-7523

**Nuqul ka reebo warqadda iyo ogeyiiska diidmada.**

Waxa kale oo aad ka heli kartaa foomka codsiga racfaanka oo aad daabacan karto AMA racfaan ka diiwaan geli karto barta internetka. *(ingiriisi kaliya)*

Soo booqo bogga internetka ee DHS ee https://mn.gov/dhs ka dibna racaa talaabo talaabo:



→ Dhinaca kore ee shaashaha, guji "A-Z Topics" *(Mowduucyada A-Z)*
→ Hoos u raac oo guji "Appeals" *(Racfaanka)*

Markan waxa aad:

- Daabacan kartaa foomka, oo aad buuxin kartaa oo aad iimeyl ama faakis ugu soo diri kartaa DHS.
- Foomka ka buuxi shashada oo daabac oo faakis ama mailugu soo dir DHS ama
- Buuxi oo barta internetka ugu soo dir DHS.

Si kasta oo aad yeesho, waa inaad ka reebataa nuqul (koobi). Haddii aad ku soo dirto barta internetka, daabaco ka hor inta aadan gujin "Soo Gudbi Racfaanka" si aad u heysato koobi.

Foomka Soomali: DHS-0033-SOM

## Maxaa dhacaya dhageysiga ka hor?

Waxaa laguu soo diraa dhageysiga ugu yaraan 5 maalmood dhageysiga ka hor. Ogeysiiska waxaa laguugu sheegay xilliga iyo goobta, magaca qaaliga dhageysanaya racfaanka, iyo sida loola xiriiro qaaliga haddii aad dooneyso.

ogeysiiska ayaa laguugu sheegaa in dhageysiga lagu qabanayo telefoonka ama fool ka fool. Dhageysiga fool ka foolka ah ayaa wanaagsan. Dhageysiga fool ka foolka ah waxa uu ku siinayaa fursad aad kula kulanto qaaliga, qaaliga u dhiib qoraalada oo tus qoraalada kuugu muhiimsan. Waxa kale oo ay ku siisaa fursad aad warqadaahaga la fiiriso qaaliga.

Haddii ogeysiiska laguugu sheego in dhageysiga lagu qabanayo telefoonka, waxa aad codsan kartaa dhageysi fool ka fool ah. Wac ama u qor qaaliga oo weydiiso dhageysi fool ka fool ah. Waxaa laga yaabaa in qaaligu ogolaado in aad fiidyoow kaga qeyb qaadato. Haddii uu qaaligu isticmaalo dhageysi fiidyoow ah, meel ayaad joogtaa (sida dhismaha xafiiska adeegga dadweynaha ee degmada) qaaliguna meel kale ayuu joogaa (sida xafiiska Dhs ee St. Paul) Adiga iyo qaaliga waad iska arki kartaa fiidiyoowga.

Haddii adiga ama mid ka mid ah markhaatiyaashaada uu naafo yahay jir ahaan ama maskax ahaan waxay ay adkeyneysaa in ay dhageysiga uga qeyb qaataan fiidyoow, qaaliga u sheeg dhageyisga ka hor. Haddii ay xaaladdu sidaas tahay waa in adiga, markhaataigaaga iyo qaaliga aad isku meel joogtaan. Dhageysiga fool ka foolka ah waxaa inta badan lagu qabtaa dhismaha xafiiska adeegga dadweynaha ee degmada aad degan tahay.

DHS, ceymiska maareynta daryeelka, ama degmada waa in kuu soo diraan racfaanka oo la soo gaabiyey oo xambaarsan cadeymaha iyo sababta loo diiday codsigaaga. Racfaanka oo la soo gaabiyey waa laguu soo diraa 3 maalmood oo shaqada ka hor dhageysiga racfaanka ka hor.

Haddii aan laguu soo dirin racfaankala soo gaabiyey, wac qaaliga oo weydiiso in laguu soo diro. Haddii aad dooneyso waqti dheeraad ah oo aad dhageysiga isugu diyaariso waxa aad qaaliga weydiisan kartaa in dhageysiga dib loo dhigo. U sheeg qaaliga in aad u baahan tahay waqti dheeraad ah oo aad kaga jawaabto racfaanka la soo gaabiyey.

## Maxaan yeelayaa haddii aniga iyo markhaatigeyga aynaan ka qeyb qaadan karin dhageysiga maalinta loo qabtay in ladhageysto?

Wac qaaliga oo weydiiso in dib loo dhigo dhageysiga. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in dhageysiga loo qabto taariikh cusub. Haddii ay suurogal tahay, laxiriirqaaliga ugu yaraan 3maalmood dhageysiga ka hor. Waa in qaaligu qabtaa dhageysiga taariikh cusub.

- Markaahtiyaashu ha yimaadaan dhageysiga.
- Waa in aad heysataa waqti kugu filan si aad u diyaarsato cadeynta iyo doodaada
- waa in aad hubisaa in adiga iyo dhinaca kale waqti adinku filan oo aad ku eegtaan cadeymaha
- taasoo ku siineysa waqti kugu filan oo aad arrimaha heshiis kala gaarto dhinaca kale.
- dhinaca kale ha tixgeliyo in ay go’aankooda dib ugu noqdaan

- taasoo adiga iyo dhinaca kale siineysa waqti aad meesha kaga saartaan waxyaabaha markii hore hor taagnaa ama
- siineysa labada dhinacba siineysa waqti ku filan



## Ma ila iman karaa dhageysiga qof iga caawiya dhageysiga?

Waad isu hadli kartaa ama waxa aad qabsan kartaa wakiil kuu hadla. Wakiilkaaga waxa uu noqon karaa qof qoyska ka trisan, saaxiib, u doode, ama qof kale oo aad dooratay.

Waxa aad la xiriir kartaa Xarunta Sharciyada Naafada Ah ee Minnesota si ay kuugu caawiyaan qareen ama u doode ku matala.

## Maxaan la imaan karaa dhageysiga?

Soo qaado dhamaan qoraalada taageeraya dacwadaada. Waxaa ka mid noqon kara:

- Warqadaha iyo warbixinada dhakhtarkaaga (sida dhakhaatiirta iyo daaweeyayaasha) oo ay ku sharxayaan sababta ay u baahan yihiin gargaarka farsamada casriga ah.
- Macluumaadka ku saabsan xaaladaada caafimaadka iyo sida ay u xididan tahay waxyaabaha aad qabsan karto.
- Macluumaadka ku saabsan farsanada casriga ah ee aad u baahan tahay.

U soo qaad nuqul (dheeraad ah) qaaliga oo aad uga tagto. Waa inaad u keento nuqul (copy) qoladda kale ama aad u dirto iyaga ka hor waqtiga balanta. Macluumaad ku saabsan sida aad ku heli karto koobi lacagta kaaga baxdo dib laguugu celiyo, akhri *Mala ii celinayaa kharashka iiga baxa isu diyaarinta iyo tegitaanka dhageysiga*? ee dhamadka xaashidan.

## Waa maxay qoraalada aan ka heli karo DHS ama dhinacyada kale?

Weydiiso in ay kuu soo diraan ogolaashihii hore ee ku jira diiwaanka. Galkan waxaa ku jira dhamaan waxyaabaha uu dhakhtarkaagu soo gudbiyey oo uu ku taageerayo codsigaaga. Waxaa sidoo kale ku jira qoraalkaku saabsan sababka loo diiday codsigaaga.

Waxa kale oo aad weydiisan kartaa nuqul ka mid ah sharciyada DHS ama waxyaabaha ay dhinaca kale isticmaalaan go'aanka ay ka gaareen codsigaaga.

Lagaama soonayo in aad lacag ku bixiso qoraalada.

## Maxaa dhacaya haddii ay DHS ama dhinaca kale diidaan in ay ii ogolaadaan diiwaanka ama galka?

Haddii ay DHS ama dhinaca kale aanay kuu ogolaan macluumaadka ku jira galka, la xiriir ama u qor qaaliga oo weydiiso inuu soo saaro amar uu ku farayo in ay ku siiyaan macluumaadka. Waa in aad qaaliga u sheegtaa waxa aad dooneyso iyo sababta aad ugu dooneyso racfaankaaga.

## Sidee ayaan ku ogaan karaa haddii uu jiro racfaan kale oo arrintan oo kale looga qaatay?

Gobolku waxa uu soo bandhigaa dhamaan dhageysiyada la qabto (iyada oo laga reebay magaca dadka lagu aqoonsan karo).

Waxa aad ka raadsan kartaa go’aanadii hore ee ku keydsan barta internetka. Soo booqo bogga internetka ee DHS ee https://mn.gov/dhs ka dibna raac talaabo talaabo sida hoos ku xusan:



→ Dhinaca kore ee shaashaha, guji “A-Z Topics” *(Mowduucyada A-Z)*
→ Hoos u raac oo guji “Appeals” *(Racfaanka)*
→ Hoos u raac oo guji “Fair Hearing Appeals” *(Dhageysiga Racfaanka)*

Haddii ay jiraan go’aano kaa caawin kara racfaankaaga, nuqul ka sii qaaliga marka la qabto dhageysiga.



## Ma ila iman karaa dhageysiga markhatiyaal?

Haa. markhaatiyaashu way imaan karaan dhageysiga. Waxa markhaati noqon kara adiga, qofka PCAga ah, daaweyn, dhakhtar, ama qof kasta oo haya macluumaad la xiriira. Haddii aanu markhaati kuu soo raaci karin dhageysiga, waxa ay markhaatigooda ku bixin karaan dhageysiga ama hadal qoraal ah.

U sheeg markhaatiigaaga qalabka aad codsatay in laguu diiday. U sheeg in aad u baahan tahay markhaatigooda in ay kaa caawiyaan racfaanka. Sii nuqul ka mid ah qoraalada taageeraya codsigaaga iyo qoraalada DHS ama dhinaca kale oo aad u faahfaahisaa sababta sababta qalabka loo diiday.

Haddii adiga ama markhaatigaaga aadan ku hadal afka Ingiriisga, waxaa la idiin qabanayaa turjubaan lacag la’aan ah.

## Maxaan yeelayaa haddii aanu markhaatigu dooneyn in ay markhaati furaan?

Haddii markhaatigu u shaqeeyo DHS ama dhinac kale, la xiriir ama waraaq u qor horjoohgaha oo weydiiso horjoogaha in markhaatiga uu yimaado maxkamadda. Haddii aanay taas shaqeyn, weydii qaaliga inuu ku siiyo maxkamad uga yeeris si markhaatigu maxkamadda u yimaado. Maxkamad uga yeeris waa amar maxkamadeed oomarkhaatiga faraya in ay hor yimaadaan maxkamadda.

## Yaa ka qeyb qaadanaya dhageysiga?

- Qaaliga
- Adiga
- Markhaatiyayaashaada ama wakiiladaada,
- Waxaa laga yaabaa in dhinaca kale ay ka joogaan wakiilo ama markaahtiyaal.

DHS inta uma soo dirsato wakiilo dhageysiga. Waxaa suurogal ah in ay u soo diraan qaaliga hadal qoraal ah.



Mararka qaarkood DHS waxa ay ay keenaan dhageysiga orraah qoraal ah oo la doonayo inuu ka jawaabo iibiyaha qalabka. Iibiyaha qalabka ayaa kaga jawaabi kara dhageysiga ama weydiisan kara inuu u baahan yahay waqti dheeraad ah oo uu ku diyaariyo macluumaadka dheeraadka ah. Xaaladaha intooda badan, hadal qoran oo dhakhtarka ama daweeyuhu soo qoro ayaa ka xoog badan markhaatiga dadka kale.

Ceymiska maareynta caafimaadka iyo degmooyinku waxa ay inta badan dhageysiga u soo dirsadaan wakiilo faahfaahin ka baxaya go'aanka ay ku diideen gargaarka farsamada casriga ah. Waxaa laga yaabaa in wakiilku kaga qeyb galodhageysiga oo uusan goob joog ka aheyn dhageysiga.

## Maxaa dhacaya dhageysiga?

Dhageysiga waa la duubayaa. Qaaliga ayaa dhaaariya markhatiyaasha oo dhan. Qaar badan oo ka mid dhageysiga, waxa uu qaaligu ogolaadaa in dhinac walba uu caddeeyo mowqifkiisa isaga oo aan ka jawaabin su'aalo gaar ah.

Marka ay labada dhinac leeyihiin qareen, inta badan waxa uu u dhacaa sida dhageysi aan rasmi aheyn. Mid ka mid ah dhinacyada ayaa bilaaba, laakiin inta badan qaaligu waxa doonayaa inuu maqlo dhinaca kale oo ka dhageystaa sababta diidmada. Inta badan DHS wakiil uma soo dirsadaan dhageysiga oo waxa ay ku kalsoonaadaan hadalka qoraalka ah ee ay soo gudbiyaan dhageysiga ka hor.

Haddii ay jirto su'aal aadan ka jawaabi karin inta uu socdo dhageysiga, waxa aad weydiisan kartaa waqti dheeraad ah oo aad isku diyaariso oo qaaliga aad macluumaadka ugu soo gudbiso. Macluumaadka waxaa laga yaabaa in aad ka heli karto dhakhtarkaaga ama daaweeyaha.

## Cadeyn intee le'eg ayaa laiga doonayaa in aan keeno si aan ugu guuleysto dacwadda?

Waxa aad u baahan tahay inaad soo bandhigto inta ugu badan ee daliilo ah ee suurtagal ah ee ku saabsan shuruudaha ogolaanshaha. Dhinaca kale, waxaa lagaa doonayaa in aad soo bandhigto sida mid kasta oo ka mid ah qodobada ogolaashaha aad uga soo baxday.

Dhinaca kale waxa ay isku dayayaan in ay qaaliga u soo bandhigaan in codsigaaga aanu ka soo bixin shruuudaha ogolaashaha. Tusaale ahaan, DHS ama dhinaca kale waxaa laga yaabaa in ay soo bandhigaan inuu jiro qalab kale oo la mid ah kan aad codsaneyso qiimahana ka jaban.

## Maxaa dhacaya dhageysiga ka dib?


DHS waxa ay go'aankooda ku soo diraan boostada. Waxa aad heysataa 90 cisho ee taariikhda aad codsato dhageysiga. Go’aanka waxaa ku lifaaqan talososo jeedinta qaaliga ee Gudoomiyaha Gudiga Adeegga Dadweynaha. Waxaa laga yaabaa in gudoomiyuhu ogolaado ama diido talo soo jeedinta qaaliga.

Haddii uu Gudoomiyuhu ogolaado talo soo jeedinta qaaliga, waa Gudoomiyuhu faahfaahin buuxda ka bixiyaa sababta oo oo uu soo raacaiyaa amarka wax laga bedelay.

Dhinac kasta waxa uu heystaa muddo 10 cisho ah oo uu kaga jawaabo isbedelka amarka Gudoomiayaha oo soo raacisaa cadeyn cusub oo dheeraad ah. Gudoomiyaha ayaa ka dib soo saara go’aanka ugu dambeeya.

## Mala ii celinayaa kharashka iiga baxa isu diyaarinta iyo tegitaanka dhageysiga?

Xaaladaha intooda badan, degmada ayaa bixisa gaadiidka, lacagtailmaha lagu hayo, sawirka qoraalada, qiimeynta caafimaadka, kharashka markhaatiyaasha, iyo kharashyada ee suurogalka ah muhimkana ah ee u diyaargarowga iyo tagitaanka dhageysiga. Waraaq u dir degmada oo soo raaci cadeynta kaharshaka.



## Racfaan maka qaadan karaa go’aanka Gudoomiyaha?

Haddii aadan ku raacsaneyn go’aanka Gudoomiyaha, waxa aad weydiisan kartaa inuu dib u tixgeliyo go’aanka ama waxa aad ka racfaan uga qaadan kartaa Maxakamadda Degmada.

Haddii aad dooneyso in aad codsato dib u tixgelin, waraaq u dir Gudoomiyaha adiga oo raacinaya sababaha aad u aaminsan tahay in go’aakiisu khalad yahay iyo haddii ay jiraan cadeymo cusub oo caawin kara racfaankaaga. Waa in aad u soo dirtaa nuqul ka mid ah warqadda iyo cadeynta cusub 30 cisho gudahood laga bilaabo taariikhda go’aanka.

Dhinaca kale waxa ay heystaan 10 maalmood in ay kaga soo jawaabaan. Gudmooyihu wuu diidi karaa codsiga dib u eegista ama soosaari karaa amar kale oo wax laga bedelay.

Haddii aad dooneyso in aadan codsan dib u tixgelin ama aadan jecleysan go’aanka ka soo baxa dib u tixgelinta, waxa aad racfaan uga qaadan kartaa Maxkamadda Degmada. Waxaa lagaa doonayaa in aad racfaan ku qaadato 30 maalmood go’aanka ugu dambeeya ee Gudoomiyaha iyo 3 maalmood haddii go’aanka laguu soo diray boostada. Racfaanka Maxkamadda Degnmada waa mid sharci ah oo rasmi ah. Waxaa haboon in aad qareen lahadasho ka hor inta aadan racfaanka diiwaan gelin.

## Sidee Ayaan Ula Xiriiraa Xarunta Sharciyada Dadka Naafada ah

Xarunta Sharciyada Dadka naafada ah waa mid lacag la'aan ku caawisa dadka naafada ah ee degan Minnesota.

Si aad u codsato caawimaad, wac:
Beledyadda: (612) 334-5970
Telefoonka lacag la'aanta ah: 1-800-292-4150

Dhamaan wicitaanadda kale oo dhan: (612) 332-1441

Minnesota Disability Law Center
(Xarunta Sharciyada Dadka naafada Ah)
111 North 5th Street, Suite 100
Minneapolis, MN 55403

https://mylegalaid.org/disability-law-center/



*Warqadan xogta aruursan ah waxaa lagu soo sameeyey maalgelin laga helay Hab Farsamo ah si loo Gaaro Natiijooyin wacan (STAR), kaa oo ah barnaamij ay leedahay Waaxda Maamulka ee Minnesota (Minnesota's Department of Administration) ayna u maalgelisay hay'ada Maamulka Adeegyada Dhaqancelinta ah si waafaqsan Sharciga Gargaarka Farsamadda Casriga ee 1998 (Assistive Technology Act of 1998), ee la cusboonaysiiyey (P.L. 108-364).*

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**